Deeqda caawimada sharciga

Deeqda caawimada sharcigu waa lacag loo isticmaalo in lagu bixiyo garyaqaanka Victoria Legal Aid (Gargaarka Sharciga ee Fiktooriya) ama garyaqaan gaar ah oo kaa caawima dhibaatada sharci. Garyaqaan wuxuu awoodaa:

- inuu ku siiyo talo sharci
- inuu kaa caawimo heshiis
- diyaarinta dukuminti sharci ah
- inuu maxkamada ku matalo.

Helitaanka deeqdu waxay ku xiran tahay xaalladaada dhaqaale iyo dhibaatada sharci. Deeqda badanaa waxaa loo bixiyaa arrimo dembi ama qoys, laakiin waxay noqon kartaa xaallad madani ah sida takoorid, immigrayshan, damaanada bulshada ama arrima la xiriira caafimaadka dhimirka.

Deeqdu badanaa maaha bilaash. Qadarka aad soo celinaysaana waxay ku xiran tahay xaalladaada dhaqaale.

Na soo wac si aad u ogaato sidaan kuu caawin karno.

Helida mutarjum

Waad heli kartaa mutarjum. Markaad na soo wacdo, weydii mutarjum afkaaga ku hadla. Haddii aad ballan la leedahay xafiiska Victoria Legal Aid, codso in laguu hello mutarjum.

Waxaad kaloo wici kartaa Translating and Interpreting Service (Adeega Afcelinta iyo tarjumida Qoraalka) 131 450 weydiisana in lagugu xiro Victoria Legal Aid.

Ixtiraamida xogtaada qarsoodiga ah

Ma siin doono macluumaadkaaga shakhsiyeed qofna, haddii aan sharcigu wax kale oran.

Waxaanu ixtiraamnaa qarsoodiga macmiilayaashayada. Sidaas darteed, haddii aanu horay u caawinay qof kayskaaga lug ku leh, waxaan ku siin karaa keliya macluumaad guud. Si kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in aan kuu xawilo garyaqaan ama urur kale.

Our Legal Information Service
(Adeegyaga Macluumaad ee Sharciga)

Waa furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha,
8.45 subaxii ilaa 5.15 casarkii

Tel 9269 0120 ama dadka magaalaweynta ka baxsan 1800 677 402

Nala soo xiriir si aad u hesho macluumaad lacag la'aana oo ku saabsan sharciga iyo sida aan kuu caawin karo. Waxaad la hadli kartaa qof ku hadla Ingiriiska ama luqada kale.

Xafiisyadayada

Isniinta ilaa Jimcaha, 8.45 subaxii ilaa 5.15 casarkii

Bairnsdale	5153 1975
Ballarat	5329 6222
Qiimaha halkaad joogto	1800 081 719
Bendigo	5448 2333
Qiimaha halkaad joogto	1800 254 500
Broadmeadows	9302 8777
Dandenong	9767 7111
Frankston	9784 5222
Geelong	5226 5666
Qiimaha halkaad joogto	1800 196 200
Horsham	5381 6000
Qiimaha halkaad joogto	1800 177 638
Melbourne	9269 0120
Morwell	5134 8055
Preston	9416 6444
Ringwood	9259 5444
Shepparton	5823 6200
Sunshine	9300 5333
Warrnambool	5559 7222
Qiimaha halkaad joogto	1800 651 022

Xafiiskayaga waa geli karaan dhamaan dadka leh iinta.

Maktabadayada sharciga dadweynaha

Waxay furan tahay Isniinta ilaa Jimcaha, 9 subaxii ilaa 5 casarkii
350 Queen Street, Melbourne

Websaytkayaga

www.legalaid.vic.gov.au

DLP-CO-SOM-0908

Printed on recycled paper

Do you have a legal problem? **Somali**

September 2008

Ma qabtaa dhibaato sharci?
Victoria Legal Aid

Somali

Ma qabtaa dhibaato sharci?

Victoria Legal Aid

Wixii ku saabsan Victoria Legal Aid

Waxaan kaa caawin karaa dhibaatooyinka sharciga wixii ku saabsna arrimaha dembiga, burburka qoyska, rabshada qoyska, kaalmada ilmaha, imagarayshanka, damaanada bulshada, caafimaadka dhimirka, takoorida, masuuliyada iyo maamulka, kiraysiga, deynta iyo gafafka gaari wadida.

Adeegyadayada

Adeegyadayada bilaashka ah waxaa ku jira:

- macluumaadka ku saabsan telefoonka
- qoraallada iyo war kala qaadashada
- maktabada sharciga dadweynaha
- tala ku-siinta maxkamadaha iyo taraybuunalada badankood, ama ballan.

Waxaanu kaloo siinaa deeqda caawimada sharciga dadka aan awoodin garyaqaan.

Macluumaad lacag la'aana oo telefoonka lagugu siinayo

Ku wac lacag la'aan Legal Information Service (Adeega Macluumaadka Sharciga) wixii macluumaada oo guud si laguugu sheego telefoonka wixii la xiriira sharciga iyo sidaan kuu caawin karno. Waa furan tahay Isniinta ilaa Jimcaha, 8.45 subaxii ilaa 5.15 casarkii. Nagala soo xiriir (03) 9269 0120 ama 1800 677 402 (wacayaasha durugsan).

Waxbarashada sharciga lacag la'aanta ah ee Bulshada

Waxaan haynaa buug aad bilaash ku helli karto oo ku qoran afka Ingiriiska iyo luqada kale oo la xiriira sharciga iyo adeegyadayada. Waxaad ka helli kartaa buugga websaytka ama xafiis kasta oo uu leeyahay Victoria Legal Aid.

Waxaan kaloo qabanaa barnaamijyo ku saabsan furiin lacag la'aana. Barnaamijyadaas waxaa lagu bixiyaa Ingiriis. Haddii aad dhibaato ku qabto fahmida Ingiriiska waxaad soo kaxaysan kartaa qof saaxiib ama qaraaba ah oo kuu tarjuma.

Talo sharci oo bilaash ah

Waxaan leenahay garyaqaano kaala hadli kara sida sharcigu u khusayo dhibtaada sharci iyo wixii aad ka qaban karto.

Waxaanu bixinaa talo sharci oo lacag la'aana oo khuseeya dhibaatooyin badan oo sharci, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

- arrimaha dembiga
- arrimaha burburka qoyska
- rabshadaha qoyska
- gafafka aadka u xun oo gaari wadida iyo ganaaxyada
- arrimaha madaniga ah iyo arrimaha xuquuqda aadamiga, kuwaas oo ay ku jiraan damaanada bulshada, deynta, caafimaadka dhimirka, imagarayshanka, masuuliyada iyo arrimaha takoorida.

Ma aanu bixino talo sharciyeed ama arrima ganacsi, sida arrimaha cashuuraha ama sharciga tijaarada, gadashada hantida, sharciga lacagta dhowrtada ah (superannuation), gadashada guriga, sharciga ama sharciga hantida aqooneed (intellectual property law).

La xiriir xafiiska Victoria Legal Aid oo ku qoran gadaal si aad u samaysato ballan.

Garyaqaanada maxkamada

Waa muhiim inaad hesho talo sharci ka hor inta aadan aadin maxkamada.

Si kasta ha ahaatee, haddii aadan garyaqaan haysan, waxaan leenahay garyaqaano jooga maxkamad walba iyo taraybuunal walba oo ku yaalla Fiktooriya.

'Garayaqaanadaan' hawsha ku jira waxay caawimaan dadka maxkamadooda la qaadayo. Waxaana laga yaabaa in ay kaaga hadlaan maxkamada.

Dad badan ayaa doonaya inay arkaan garyaqaanka kaltanka ku jira, sidaas darteed waxaa laga yaabaa in aanaan caawin qof walba. Waa in aan caawinaa dadka qaarkood marka hore. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- kaysaska aadka u xun, kuwaas oo ay ku jiraan dad xiran ama dadka khatarta ugu jira in la xiro
- arrimaha lugta ku leh carruurta
- dadka aan iska bixin karin caawimada sharciga
- dadka aan helli karin talada sharciga ah ka hor inta aanay maxkamada aadin.

Weydii shaqaalaha maxkamada ama taraybuunalka jooga in garyaqaan kaltanka ku jiro.

Adeega xalinta khilaafaadka qoyska

Maaraynta Khilaafka La-wada-joogo (Roundtable Dispute Management) waa adeeg lacag la'aana. Waxay caawintaa waalidiinta is-furayaa inay xalistaan khilaafkooda qoys iyaga oo aan aadin maxkamad. Khilaafkaasi wuxuu noqon karaa midka waalidnimada, dayactir iyo maaraynta arrinta dhaqaalaha.

Si aad u isticmaasho adeega, ugu yaraan hal qof oo qoyska is-haya ah waa inuu haystaa deeqda caawimada sharciga. Macluumaad intaas ka badan na soo wac ama la hadal garyaqaankaaga.